MHUURIYADDA SOMALILAND
WASAARADDA BOOSAHA IYO
ISGAADHSIINTA

REPUBLIC OF SOMALILAND
MINISTRY OF POST &
TELECOMMUNICATION

XEERKA ISGAADHSIINAHA SOMALILAND
(Somaliland CommunicationS Act, 2004)

# XEERKA ISKU-XIDHNAANSHAHA EE ISGAADHSIINTA JAMHUURIYADDA SOMALILAND
(The Interconnectivity Regulations of Republic of Somaliland).

## JAMHUURIYADDA SOMALILAND
## Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta

**HORDHAC**


| | |
|---|---|
| **QAYBTA 1AAD:** | GOGOLDHIG |
| **QODOBKA 1AAD:** | RAY BIXIN |
| **QAYBTA 2AAD:** | WOODAHA IYO WAAJIBAADKA WASAARADDA. |
| **QODOBKA 2AAD:** | WOODAHA IYO WAAJIBAADKA WASAARADDA |
| **QAYBTA 3AAD:** | UDDIGA HABAYNTA |
| **QODOBKA 3AAD:** | ASAASIDDA |
| **QODOBKA 4AAD:** | ARUNTA |
| **QODOBKA 5AAD:** | JEEDDOOYINKA |
| **QODOBKA 6AAD:** | WOODAHA IYO WAAJIBAADKA GUDDIGA |
| **QODOBKA 7AAD:** | UBNAHA GUDDIGA |
| **QODOBKA 8AAD:** | EERKA WAXBARASHADA XUBNAHA GUDDIGA |
| **QODOBKA 9AAD:** | JUURADA |
| **QODOBKA 10AAD:** | HIRARKA GUDDIGA |
| **QODOBKA 11AAD:** | UDDOOMIYAHA GUDDIGA |
| **QODOBKA 12AAD:** | UDDOOMIYE KU XIGEENKA |
| **QODOBKA 13AAD:** | MIISAANIYADDA |
| **QODOBKA 14AAD:** | UUGAAGTA XISAABAADKA |
| **QAYBTA 4AAD.** | HARDIYADA IYO SHURUUDAHA RUQSADAHA (LIISANNADA) IYO QOONDAYNAHA QAYBINTA MAWJADAHA. |
| **QODOBKA 15AAD:** | UQSADAHA |
| **QOQOBKA 16AAD:** | HURUUDAHA LIISAN BIXINTA |
| **QODOBKA 17AAD:** | OONDAYNTA QAYBINTA MAWJADAHA |
| **QODOBKA 18AAD:** | USBOONAYSIINTA IYO BURINTA LIISAMADA |
| **QAYBTA 5AAD:** | |
| **QODOBKA 19AAD:** | OOCA ANSIXINTA U BAAHAN |
| **QODOBKA 20AAD:** | SKU-XIDHIIDHINTA TELEFOONNADA |
| **QODOBKA 21AAD:** | ARSOODINIMADA ISGAADHSIINTA |
| **QODOBKA 22AAD:** | AKIBAADDA QALABKA ISGAADHSIINTA |
| **QODOBKA 23AAD:** | ORSHAHA LAMBARKA QARANKA |
| **QODOBKA 24AAD:** | AALADAHA DEG DEGGA AH EE WADDANKA |

| | |
|---|---|
| **QAYBTA 6AAD:** | MULKA LIISANNADA IYO DHAWRIDDA MANAAFACAAD-SIDAYAASHA |
| **QODOBKA 25AAD:** | WOODDA LAGU DABRAYN RUQSADLAHA IYO ILAALINTA XUQUUQDA KA FAA'IIDAYSTAYAASHA. |
| **QODOBKA 26AAD:** | IIMAHA |
| **QODOBKA 27AAD:** | ARBIXIN SANNADEEDKA |
| **QAYBTA 7AAD:** | ODOBBO QUBANE AH |
| **QODOBKA 28AAD:** | ORSHAYNTA MAGAALADA<br>WARBIXIN SANNADEEDKA LOO GUDBINAYO GOLAHA XUKUUMADDA IYO GOLAAH WAKIILLADA |
| **QODOBKA 29AAD:** | EBNAANTA |
| **QODOBKA 30AAD:** | RBIXIN SANNADEEDKA EE GOLAHA WASIIRADA IYO WAKIILLADA. |
| **QODOBKA 31:** | QAABTA (PENALTIES) |
| **QODOBKA 32:** | RTIRIDDA XEEKA (REPEALS) |

## QODOBKA 1AAD
## AWOODAHA IYO WAAJIBAADKA WASAARADDA

7. Dhiirrigelinta buddhigidda Waxbarasho Horukac leh iyo Barnaamijyo Tababar oo ku saabsan Isgaadhsiinta.
8. Baahinta ku baraarugsanaanta Muhiimadda kaalinta Isgaadhsiinta ee dhaqaalaha guud iyo horumarka bulshada
9. Ka faa'iidaysiga xogta guddiga hawl-wadeennada Isgaadhsiinta waaxyaha xukuumadda, iyo munaasabadaha gaarka ah, iyo iyaga oo daabacaya waxyaabahaas si ay uga faa'iidaystaan kuwaa loo adeego iyo kuwa adeegayaba.
10. Iyada oo la tashanaysa Wasaaradda Maaliyadda hawl-wadeennada Isgaadhsiinta, ayay wasaaraddu go'aamin-tacriifooyinka adeegyada isgaadhsiinta
11. Kan fiiga rukhsadaha (Liisannada)

5. In la xiiso geliyo tartanka isgaadhsiinta dhexdeeda, iyadoo loo cuskanayo xoogagga suuqgeynta, lana xaddidayo si loo hubiyo suuqgeynta helidda adeegyada isgaadhsiinta.
6. Reebnaanta ka soo horjeedka tartanka, dabci ahaan iyo ficil ahaanba, iyadoo la mamnuucayo falalka cidkastoo meel kaga dhacaysa iyadoo tallaabooyinka loo baahdo ka qaadaysa ku xadgudbeyaasha .
7. Bixinta Liisannada (Rukhsadaha), kormeeridda hawlwadeennada adeegyada isgaadhsiinta
8. Hannaaninta Noocyada Qalabka Isgaadhsiinta ee lagu xidhiidhin karo habka isgaadhsiinta.
9. Awood siinta iyo kormeeridda isticmaalka mowjadaha loo qoondeeyay Somaliland.

## QAYBTA 2AAD
## AWOODAHA IYO WAAJIBAADKA WASAARADDA.

## QODOBKA 2AAD

Wasaaraddu waxay yeelan dontaa awoodaha iyo waajibaadyada hoos ku quran: -

1. Diyaarinta Siyaasadda guud ee adeegyada isgaadhsiinta dalka, iyadoo siyaasddaas u gudbin doonta golaha wasiirada si ay u ansixiyaan;
2. Sababaynta ballaadhinta adeegyada isgaadhsiinta geyiga Somaliland gudihiisa;
3. Iyadoo la tashaynaysa guddiga, inay diyaariso xeerar qabyo u ah oo ku saabsan xeer hoosaadyada adeegyada isgaadhsiinta;
4. Kormeeridda hawl-qabadka hawl-wadeennada adeegga isgaadhsiinta;
5. Dabagalka dhaqan galka axdiyada adeegyada isgaadhsiinta ee Somaliland ay ka midka tahay;
6. Kor u qaadidda horukaca cilmi baadhista, iyo horumarinta goobaha adeègyada igaadhsiinta
7. Raadinta iyo hirgelinta Natinal Gateway iyo Shenteraal dhexe.

## QAYBTA 3AAD
## HABSAMIDA GUDDIGA

### QODOBKA 3AAD
### ASAASIDDA HABSAMIDA

1. Guddiga Isgaadhsiinta ayaa xeerkan lagu asaasaasay, iyagoo leh jiritaan iyo ismaamul guddiyeeddo.
2. Guddigu wuxuu hoos imanayaa Wasiirka Wasaaradda.

### QODOBKA 4AAD
### XARUNTA

Guddiga xaruntiisu waxay noqonaysaa Hargeysa, waxaanu xaq u leeyahay in uu xafiisyo ka furto meel kastoo dalka ka mid ah.

### QODBKA 5AAD
### UJEEDDOOYINKA

Ujeeddooyinka Guddiga Waxay noqon doonaan kor u qaadidda horumarinta isgaadhsiin tayo sare leh.

Karti iyo hufnaan la isku hallayn karo, lana wada awoodi karo isticmaalkeeda.

### QODOBKA 6AAD
### AWOODAHA IYO WAAJIBAADYADA GUDDIGA

Guddigu wuxuu yeelanayaa awoodahan iyo waajibaadyadan: -

1. Xeer hoosaadyo u dejinta adeegyada isgaadhsiinta ee waafaqsan siyaadda guud ee loo dhisayo, si ay u suurto gasho xaqiijinta tayo sare ee adeegyada isgaadhsiinta ay helaan adeegsadeyaashu oo ah mid caqli gal ah qiimo ahaanna la awoodi karo;
2. Hubinta in adeegyada isgaadhsiintu lagu wado habka ugu fiican ee u adeegaha kobciinta dhaqaalaha dalka iyo kan horumarinta bulshada;
3. Tilmaamidda heerarka farsamo iyo hababka ee keenaya adeegyada isgaadhsiinta;
4. Xaqiijinta in adeegyada isgaadhsiintu ay waafaqsan yihiin heerarka sare ee tilmaaman.

**GUDDIGA**

10. Ka Qayb-galka Kullanada iyo Ururrada Caalamiga ah iyadoo xukuumadda ka wakiil ah, taas oo ku xidhan ogolaanshaha wasaaradda.
11. Samaynta Xeerar iyo heerar farsamo, kuwaas oo dhisaya isku xidhnaanta howl-wadeennada isgaadhsiinta kala duwan dhexdooda.
12. Iskaashiga hay'adaha waxbarashada si kor loogu qaado farsamada waxbarashada ee goobaha isgaadhsiinta.

13. Ururinta fiiga Liisammada si waafaqsan qiimaha ay Wasaaraddu u goysay.
14. Diyaarinta iyo soo saarista waxbixin sannadeed muujinaysa hawl qabadyada guddiga, guulaha horumarka farsamada, iyo isbeddellada kale ee siyaasadda guud ee la xidhiidha adeegyada isgaadhsiinta.
15. Guddigu wuxuu yeelan karaa hanti, waxaanu geli karaa qandaraasyo, guddiga wa la dacweyn karaa isna wax wuu dacweyn karaa.
16. Gudashada hawl kasta oo kale si waafaqsan xeer kasta oo dhaqan galay.

## QODOBKA 7AAD
## XUBNAHA GUDDIGA

1) Guddigu wuxuu yeelanayaa Toddoba (7) xubnood oo uu magacaabayo Madaxweynuhu iyadoo Wasiirku soo jeedinayo talo ahaan. Guddoomiyaha Guddiga iyo ku-xigeenkiisaba waxa magacayaabaya Madaxweynaha.
2) Muddada xilka Guddigu waa Afar (4) sano iyadoo cusboonaysiintu la muddo tahay.
3) Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga waxay soo gudbin doontaa caddayn saamaynaysa in aan wax dan ahi ka dhexayn isaga iyo maalgesheyayaasha isgaadhsiinta, isla markaana wargelin doono guddiga, wax la xidhiidha dantaas oo timaadda muddada uu xubinta ka yahay Guddiga.

   Ka Baaqashada Arrintan waxay keeni kartaa suuragalka hoos imashada sharciga.
4) Xubinimada Guddiga waxay ku buraysaa sababahan: -
   b. Istiqaalo (Is-casilaad)
   t. Muddada xilka guddiga oo dhammaata
   j. Ka baaqsashada ka qayb galka lixda kal-fadhi ee sannad oo dhan.

## QODOBKA 8AAD-
## HEERKA WAXBARASHO EE XUBNAHA GUDDIGA.

1. Heerka Waxbarashada Guddiga sare
2. Waa inuu aqoon u leeyahay, hababka iyo shirkadaha isgaadhsiinta.
3. Inuu ka soo shaqeeyay mid ka ah shirkadda isgaadhsiinta ugu yaraan muddo shan sano ah.
4. Inuu dhammaystay heer Jaamicad Isgaadhsiineed iyo mid Teknoolajiyeed.

## QODODBKA 9AAD.
## AJUUROOYINKA.

Mushahaarooyinka gunnooyinka iyo waxtarka kale ee maaliyadeed ee xubnaha Guddiga waxa lagu qeexi doonaa wareegtooyinka magacaabista.

Awood la'aan hawl-qabasho, laxaad ahaan ama maskax ahaan, taas oo ay u suurogali waydo gudashada xilkiisa loo idmay ee xubinnimada guddiga.

5. **Xilka Qaadis.**

Madaxaweynuhu, marka uu helo soo jeedinta Wasiirka, wuxuu burin karaa xubinnimada guddi cid kastoo Guddiga ka mid ah, haddii xubintu ku xad-gudubto shuruud kasta oo ka mid ah xubinnimada.

6. Madaxweynuhu, wuxuu u magacaabay xubin kale/xubno kale oo dhamaysata muddada xilka bixinta/xubnaha muddo ugu badan oo ah 30 maalmood gudahood.

## QODOBKA 10AAD

## SHIRARKA GUDDIGA

1. Guddiga wuxuu yeelan doonaa shirar ugu yaraan bishiiba hal mar, Shirlayada oo Guddoomiyaha Guddiga ama ku xigeenkiisa marka uu maqan yahay iyadoo shirarku ku qabsoomi ka soo qayb galka xubnaha Guddiga aqlabiyaddoodu, haddii Guddoomiyuhu ama ku xigeenkiisu midkood joogo.

   Guddiga go'aannadiisu waxay ku meel marayaan aqlabiyadda tirade ka soo qayb gasha. Haddii codku isle'ekaado, Guddoomiyaha ayaa yeelan doona cod dheeri ah oo lagu kala baxo.

2. Guddoomiyuhu wuxuu awood u yeelan doonaa qabashada shir aan caadi ahayn, waxa kale oo shir lagu qaban karo soo jeedin qoraal saddex xubnood oo guddiga ka tirsan ka yimaaddo.

3. Guddoomiyuhu wuxuu u magacaabayaa midka ka mid ah shaqaalaha Guddiga xog-hayaha guddiga, kaas oo la tashanaya guddoomiyuhu wuxuu diiwaan gelin doonaa fadhiyada, isla markaasna xafidi doonaa dukumeentiyada guddiga ee ku saabsan hawl qabadkkooda, waxa kale oo uu qaban doonaa wixii howlaha ama shaqo ah ee loo qoondeeyo.

## QODOBKA 11AAD

## GUDDOOMIYAHA GUDDIGA

1. Guddoomiyuhu wuxuu noqon doonaa sarkaalka madaxa hawl fulinta ee guddiga, wuxuuna jihayn doonaa, isagoo maamuli doonaa hawl-qabadka guddiga, marka uu maqan yahay Guddoomiye-xigeenka ayaa waajibaadkiisii fulinaya.

2. Guddoomiyuhu wuxuu: -

   b. Ku camal falayaa awoodaha iyo waajibaadyada guddiga ee ku xusan qodobka 6aad ee xeerkan.

   t. Isaga oo la tashanaya xubnaha guddigu wuxu shaqaalayn doonaa, maamulina doonaa shaqaalaha guddiga.

   j. Diyaarin doonaa, una gudbin doonaa xukuumadda barnaamijka iyo miisaaniyadda guddiga, fulin doonaa ansixintooda ka dib.

   x. Socodsiinaya kharashka si waafaqsan miisaaniyadda loo ansixiyay guddiga.

   kh. Saxiixi doonaa qandaraasyada iyo heshiisyaa guddiga ansixiyay.

r. Noqon doonaa afhayeenka guddiga Wakiilna noqon doonaa marka lala macaamilayso dhinac saddexaad.

s. Diyaarin doonaa, una gudbin doonaa xukuumadda hawl-qabadyada iyo warbixinaha maaliyadeed ee guddiga.

## QODOBKA 12AAD

## GUDDOOMIYE-KU-XIGEENKA.

1. Guddoomiye-ku-xigeenku wuxuu wakiil ka noqon doonaa Guddoomiyaha marka uu maqan yahay.
2. Waxa kale oo uu qaban doonaa wixii hawlo ah ee guddoomiyuhu ama guddigu u idmaan.

## QODOBKA 13AAD

## MIISAANIYADDA

1. Miisaaniyadda Guddiga waxay ka iman doontaa ilahan hoos ku qoran: -
   b. Kabka xukuumadda
   t. Faa'iidada ruqsadaha iyo tacriifadaha kale
   j. Ilo kale
2. Dhigaalka ku xusan qodob hoosaadka 1aad ee qodobkan waxa la dhigi doonaa Baanka iyadoo loo fulin doono, magaca guddiga, lambar xisaabeed Bank, lana iticmaali doono sidii loogu wadi lahaa hawl-qabadyada Guddiga.

## QODOBKA 14AAD

## BUUGAAGTA XISAABAADKA

1. Guddigu wuxuu xafidi doonaa buugaagta xisaabeed sax ah oon khalad lahayn.
2. Buugaagta xisaabaadka iyo Dokumentiga kale ee maaliyadda Guddiga sannadkiiba hal (1) mar ayaa la baadhi doonaa hanti-dhowrka guud ama hanti-dhowre uu soo cayimay.

## QAYBTA 4AAD

## BAAHIYAHA IYO SHURUUDAHA RUQSAD BIXINTA IYO QAYBINTA MOWJADAHA.

## QODOBKA 15AAD

Ruqsadda Xidhiidhiyaha Isgaadhsiinta

1. Lama ogola in shirkad aan haysan ruqsad isgaadhsiineed ka hawl gasho waddanka ayagoon marka hore ogolaansho ka helin guddiga.
2. Ruqsad loogama baahan karo isticmaalidda habka isgaadhsiinta ama qalabka isgaadhsiinta Booliska, Ciidamada Qaranka, iyo adeeg kale oo oo kasta oo si toos ah u adeegsanayo qaranku nabadgelyada ummadda awgeed.

## QODOBKA 16AAD

## SHURUUDAHA RUQSAD BIXINTA

Ruqsadda waxa lagu bixin doonaa qaraar dhaqan wanaag leh ee guddiga gaarka ah, iyadoo shardi ah in heshiis shuruudo maamul leh, kuwaas oo ay ka mid yihiin qodobada iyo shuruudaha sida: -

b. Waxa looga baahan yahay operatorka leh isgaadhsiinta in uu soo saaro qiimaha iibka hab suuragal ah oo ruqsadda lagu qeexayo iyo ogeysiin sheegaysa qiimaha iibka lagu qabanayo adeegyada.

t. Salaynta qiimo goynta tacriifooyinka ku saabsan adeegyada.

j. Ruqsadluhu waa inuu u hoggaansamo sar gooasahada farsamo ama wixii kale ee looga baahan yahay oo ay ka mid yihiin halw-fulinta adeegga ee ay ku qeexnaan karto ruqsadda.

x. Ballan-qaadka ruqsadlaha in uu ku camal falayo dhaqan gelinta iyo awaamiir kasta oo uu soo saaro guddiga talo bixin la xidhiidha dhaqan gelinta siyaasadda guud ee isgaadhsiinta.

kh. Dammaanad qaadka ruqsadlaha inuu la galo heshiisyada isku xidhiidhka ruqsadlayaasha kale iyo in ruqsadluhu dammaanad qaado siinta adeegga codsadeyaasha ama manaafcaadsadeyaasha takoor la'aan.

d. Ruqsadluhu waa inuu si siman u adeegista codsadeyaasha iyo kuwa ka faa'iidaysanaya.

## QODOBKA 17AAD

## QOONDAYNTA MOWJADAHA

1. Bar kulanka maxaddadaha raadiyuhu waa hanti qaran oo isticmaalkeeda uu habayn doono guddigu isaga oo waafajinaya xeerkan. Guddigu wuxuu diyaarin doonaa isaga oo xafidi doona shaxaha iyo diiwaannada loogu baahan yahay qasdigaa.
2. Guddigu wuxuu u qoondayn karaa mowjadaha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah in loo isticmaalo.

## QODOBKA 18AAD

## CUSBOONAYSIINTA RUQSADAHA IYO BURINTOODA.

1. Ruqsad waa la cusboonaysiin karaa marka muddadiisu hore dhammaato.
2. Ruqsad lama cusboonaysiin karo haddii ruqsadluhu uu jebiyo mid kasta oo ka mid ah shuruudada iyo waxyaabaha looga baahan yaay ruqsad bixinta.
3. Cusboonaysiinta ruqsadeed waxay yeelan doontaa muddo sano ah.
4. Ruqsadda waa la burin karaa iyadoo la siinayo ogaysiin ruqsadlaha muddo 30 maalmood ah haddii: -

   b. Rusadluhu si wax-ku-ool ah oo xidhiidhsan ayuu ugu xadgudbayo shuruudaha iyo waxyaabaha looga baahan yahay, oo aanu marka guddigu

ku wargeliyo xadgudubkiisa, la iman fursado caqli gal ah, oo daaweynaha xadgudubkiisii.

t. Hadii ruqsadluhu la caddeeyo inuu kacay ama musallafay.

j. Hadii Ruqsadluhu ka baaqsado inuu bilaabo howlgalka lix (6) bilood ka dib markuu qaatay ruqsada, haddii aanay iman lama filaan (force major) taas oo ruqsadlaha ku keentay suuragal la'aan inuu shaqaaleeyo hawgalineed.

x. Lama filaan (wax ka awood badan) waxa ka mid ah aafooyinka dabiiciga ah, ee ay ka midka yihiim dareere, danabka, roobabka, iyo nooc kasta oo kale oo ah aafooyin dabiici ah, amar alle ama fal Aadami, ama dagaal dhaca.

5. Ruqsadluhu wuxuu codsanayaa in laga buriyo isaga/iyada oo soo jeedin soo gudbinaya.

## QODOBKA 19AAD

## QALABKA KU XIDHAN OGOLAANSHAHA

Guddigu waxay ogeysiinta dadweynaha ku soo saari karaan qeexista qalabkasta oo isgaadhsiineed ee u baahan ogolaanshaha guddiga ka hor inta aan lagu xidhin hab isgaadhsiineed.

1. Guddigu wuxuu xigelin siin donoaa waxyaabaha soo socda markuu ogolaansho siinayo: -
    - b. Noocyada Qalabka Ogolaanshaha u Baahan
    - t. Dayactirka, shebekadda isgaadhsiinta oo ay ku jirto xaaladaha ku sabsan ilaalinta xogta.
    - j. Electro-magnetic Compatibility
    - x. Appropriate use of electro-magnetic frequency spectrum
    - kh. Tixgelino kale oo guddigu ku go'aamin karo
2. Ma jirayo xidhiidhiye telefoon oo ku hawlan adeegyada isgaadhsiinta ama iibiya qalab isgaadhsiineedoo isticmaali doona, qaybin doona, ama iibin doonta midkay doonto ha ahaatee, nooc kasta oo qalab isgaadhsiineed oo aan la socon xeerarka farsamo iyo heerarka uu guddigu caddeeyey.
3. Way reeban tahay in la sanceeyo, iyadoon la helin ka hor ogolaansho, qalab isgaadhsiineed oo loo baahan yahay ogolaanshaha guddida.

## QODOBKA 20AAD

## ISKU-XIDHKA XIDHIIDHKA TELEFOONNADA.

Guddidu wuxuu samayn doonaa xeerarka go'aaminaya hannaanka isku-xidhka xiriirka telefoonada ee shirkada oo dhexdhexaad ah (Nueteral Interconnection). Midba midka kale xeerarka waxay hubin doonaan in adeegsaduhu telefoon kasta, Somaliland gudaheeda uu ku xidhmi karo telefoon kasta oo kale adeegsadaheeda waxaan: -

b) Muujin meelaha guda iskaga xidhnaanshuhu uu ka jiro.

t) Qeexi sida guda iskaga xidhnaanshuhu u hana qaaday yada oo lagu xisaabtamayo horumarinta farsamo ee xidhiidhiyeyaasha isgaadhsiinta.

j) Hubin in tayada adeegga loo gudbiyay dadweynuhu guud ahaan aanay ahayn mid derejo ahaan hoosaysa ee ay tahay mid heer caalami ah.

x) Bixin isdhaafsiga joogto ah ee farsamo xogeed iyo mid shebekad maamul ee la xidhiidha hawlgalka shaqada iyo xafidaada shebekadda isgaadhsiinta.

kh). Habayn qodobada iyo shuruudaha heshiisyada gudo-iskaga xidhnaanshaha hawl-wadeennada kala duwan ee isgaadhsiinta dhexdooda.

## QODOBKA 21AAD

## QASOODINIMADA ISGAADHSIINTA

Iyadoo ay jirto shuruud kasta oo kale oo ku saabsan ruqsadlaha, ruqsadluhu uxuu u haynayaa qorsoodi ahaan wax kasta oo isgaadhsiin ah oo laga sameeyay shebekaddiisa oo ku xidhan oo keli ah wax kasta oo looga baahan yahay in daboolka laga qaado waafaqsan shuruudaha Somaliland.

## QODOBKA 22AAD

## RAKIBAADDA QALABKA ISGAADHSIINTA

1. Wadayaasha (Operators) isgaadhsiintu waxay xaq u leeyihiin in ay ku rakibaan ama ku isticmaalaan qalabka isgaadhsiinta kor ama isgoysyada waddooyinka ee aan ahayn goobaha loo asteeyay danta iyo waxaan sharci ahayn: -

   b. Qalabka isgaadhsiineed ee la rakibayaa waa inuu yahay isgaadhsiin loo rakibayo adeegga macaamiisha oo waafaqsan shuruudaha ruqsadda (Laysanka) uu haysto ee isgaadhsiinta.

   t. Rakibaada qalabku waa in ayna ku keenayn xannibaad dhaqdhaqaaqa dadka iyo gaadiidka.

   j. Rakibaadda qalabku waa inay waafaqsan tahay shuruudaha go'aminta sida wadayaasha (Operators) isgaadhsiinta u fulinaaya shaqooyinka laga qabanayo goobaha dadweynaha ama u heli lahaayeen wadayaashu goobo loo beddelo lahaanshaha gaar ah (Access private Propriety) iyadoo la tixgelinayo baahida adegga isgaadhsiineed.

## QODOBKA 23AAD

## QORSHAHA HEER QARAN EE LAMBAR BIXINTA ISGAADHSIINTA.

1. Guddidu waa in uu u sameeyaa qorshe heer qaran oo lagu hormarinayo bixinta isticmaalka lamabarada telefoonada hisrkadda la siinayo oo guddidu maamuli doono.
2. Qorshaha lambar bixintu waa in uu ahaado mid la helo in isticmaamlskiisa loo siman yahay ee wadayaasha isgaadhsiinta ee kala duwan. Waa in helayaa in qaabka lambar bixintu uu dheelitiran yahay oo uu la mid yahay qaabka talooyinka

hay'adda caalamiga ah ee ururka isgaadhsiinta modoobay (International Telecommunication Union).

## QODOBKA 24AAD

## XAALADDA DEG-DEG AH EE HEER QARAN

Haddi ay dhacdo xaalad deg deg ah oo heer qaran ah oo dowladda Somaliland ku dhawaaqdo, ayadoon lagu xadgubayn shuruudihiisa lagu bixiyay ruqsadda (laysanka) isgaadhsiinta.

Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiintu waxay awood u yeelanaysaa in ay soo saarto awaamiir lagu amrayo wadayaasha isgaadhsiinta (Telecom Operators) in ay fuliyaan waajibaadka loog baahdo ee xaaladda degdega in dolwadda lala garab joogsado wixii looga baahdo ee adeeg ah.

## QAYBTA 6AAD

## AWOODDA LAGA DABRO RUQSADLAHA UGU ILAALINTA XUQUUQDA KA FII'IIDAYSTAHA

## QODOBKA 25AAD

Qof kasta oo ruqsad (Laysan) isgaadhsiineed la siiyay inuu bixinayo adeeg isgaadhsiineed waa in uu furo-goobo gaar ah oo lagu qaabilo cabashada dadka ka faa'iidaysta isgaadhsiinta iyo macaamiishooda.

Ruqsadluhu waa inuu xalliyaa sababaha keenay cabashooyinka kuna dedaalo sidii ay mar kale u dhici lahayn. Haddii cabashooyinkaasi la xidhiidhaan

- heerka farsamo ee lagu sarjaray, tayo ahaan iyo habka adeegga loo fulyay.

## QODOBKA 26AAD

## QIIMAHA (PRICES)

- Ruqsadluhu (laysan haystaha) waa inaanu kordhin fiiga ama qiimahiisa adeegga inta ka horraysa daabacaadda wargeysyada gudaha lagu baahiyay muddo bil dhan inta aan la hirgelin sicirka cusub. Haddii ayna ka duwaynayn ama ka badnayn shuruudaha lagu caddeeyay heshiiska laysanka (Licensing Agreement) ama awaamiirba iyo go'aannada guddida. Is kastaba ha ahaatee, ruqsadluhu waa inuu soo war geliyaa guddida wixii isbeddel ah ee uu sameeyo xagga fiiga ama qiimaha.

## QODOBKA 27AAD

## WARBIXIN SANNADEEDKA

Ruqsadle kastaa waa inuu soo gudbiyaa warbixin sannadeedka, isago ku muujinaya farsamada 4aad, maamulka iyo muuqaalka maaliyadda la xidhiidha bixinayaa dammaanad qaad lagu kalsoonaan karo ruqsada adeegga isgaadhsiinta siinaya dadka ka faa'iidaysanaya.

## QAYBTA TODOBAAD

## QODOBO QUBANE AH (MISC PROVISION)

### QODOBKA 28AAD

### QORSHAHA MAGAALADA (TOWN PLAN)

1. Qorshe kasta oo loo sameeyo magaalada waa in uu si cad u tuso leymanka isgaadhsiinta loogu talo galay in ay maraan.
2. Wadayaasha isgaadhsiintu (Telecom Operators) waa inay raacaan qorshaha magaalada loo sameeyay marka ay dhigayaan laymanka.

### QODOBKA 29AAD

### REEBNAANTA (PROHIBITIONS)

1. Qofna looma ogola in uu ku xidhxidho (connect) ama ka jarjaro (disconnect) laymanka isgaadhsiineed, haddii aanu ahayn qof shaqaale ah oo haysta awood qabashada howshaas. Ruqsadlaha ama guddidu siisay ruqsad.
2. Tallaabo sharci dambi laguma oogi karo sharciga guddiisa iyadoon lagala tashan Wasaaradda ama guddida.

### QODOBKA 30AAD

### WARBIXIN SANNADEEDKA EE GOLAHA WASIIRADU IYO GOLAHA WAKIILLADA

Wasaaraddu goobaha isgaadhsiinta waa in ay u gudbiso warbxiin sannadeedka waxqabadkeeda la xidhiidha isgaadhsiinta labada gole, golaha Wasiirada iyo golaha Wakiillada waxqabadku waa inuu ka jiraa: -

b) Tirada ruqsadaha (laysans) isgaadhsiineed ee ay bixisay guddida hay'adda.

t) Tirada internetyada shaqeynaya ee xidhiidhsan (connection)

j) Tirada telefoonada dhulka hoose la mariyay (Land lines) iyo Faxyada.

x) Saamiga qumman (ratio) ee cunaanta isgaadhsiinta (dencity) iyo

kh) Saamiga halkii ilbidhqsi ee lambarada mowjadaha ee shucaaca (spectrum) mowjadaha radiyaha.

### QODOBKA 31AAD

### CIQAABAHA (PENALTIES)

1. Qof kasta oo si badheedh ah isku hortaaga rakibaada isgaadhsiinta ama se dhaawac u geysta waa in lagu ciqaabo xadhig xabsi ah (Imprisonment) muddo aan ka yarayn lix bilood kana badnayn laba sannadood.
2. Qof kasta oo isticmaala ama caawiya in si sharci darro ah loo adeegsado isgaadhsiin isagoon bixin wax cashuur ah (fees) waa in lagu ciqaabaa xadhig xabsi oo ka bilaabma lix bilood ilaa laba sannadood.

3. Qof kasta oo looga yeesho Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta, wuxu leeyahay marka hore in la siiyo fursad uuu ku tago Wasaaradda ama guddida kolba halka looga yeedhay ee khusaysa waxa loogu yeedhay, inta aan la saarin wax ciqaab ah ama ayna dhicin.

## QODOBKA 32AAD

## TIRTIRIDDA XEERKA (REPEAL).

- Qaanuunka isgaadhsiinta wuxuu tirtirayaa sharci kasta ama qodob sharci ah oo lid ku ah qaanuunka waxa loo qaadanayaa waxba kama jiraan "Null and Void".